

# Public Assistance Benefits

CalWORKS, RCA, SSI, Food Stamps, MediCal



---

## Kaalmada Dawladdu Bixiso

CalWorks, RCA, SSI, Kaararka Cuntada, Kaararka Cafimaadka

---

## CalWorks Kaalmada Lacagta

August 22-keedi, 1996, Madax-weynuhu waxa uu saxiixay sharciga dib u habeynta Cayrta. Sharcigaas waxa uu joojiyey kaalmada qoysaska iyo carruurta ee loo yaqaan(AFDC), wuxuna ku badalay barnamij cusub oo la yiraahdo kaalmada ku meel gaarka ah ee qoyska baahan (TANF). Barnamijkan cusub waxa uu siinayaa gobol kasta lacag lagu magacaabo Block Grant oo u fasaxaysa gobolka in uu qoondeysto baahida dadkiisu u qabaan caawinta. California, waxay dawladdu u qoondeysay Barnaamijka CalWORKs, kaas oo bilowday 1-1-98. Warrarka hoos ku qorani waxay qeexayaan sida uu u shaqeeyo barnaamijkan.

## U-qalmidda

Sida uu qabo sharciga TANF soo galooti badan ayaan xaq u yeelanaynin barnaamijkan ilaa ay muwaadiniin Mareykan ah ka noqonayaan. Tani ma quseyso qaxootiga. Qaxootigu xaq ayey u leeyihiin TANF/CalWORKS todobada sano ee ugu horeysa kadib markii ay soo galaan Mareykanka. Haddii ayan dhafin 60-bilood ee loogu talo galay, oo ay doonayaan kaalmo, waxay u baahan yihiin in ay qaataan dhalashada Mareykanka ama ay ka shaqeeyeen isku geyn 40 rubuc Mareykanka si ay xaq ugu yeeshaan TANF/CalWORKS.

## Wakhtiga Cayiman

Mid ka mid ah isbedelada ugu waaweyn Barnaamijka CalWORKs waxaa weeye wakhtiga loo cayimay qofku in uu helo gargaarkan lacagta. Waxaa dawladda dhexe dejisay in qofku noloshiisa oo dhan uu 60-bilood heli karo caawimaadan lacagta. California, dadka, qaadanayey caawimaada lacagta 3/98, waxay heli karayaan caawimaadan ilaa 24 bilood oo kale. Dadka dalbaday 4-1-98 kadib waxay xaq u leeyihiin 18 bilood in la caawiyo. Dadka qaata gargaarkan ee aan 18 ama 24 bilood

kabacdi shaqo bilaabin, waxaa loo gudbinayaa Xafiis Dawladdu leedahay oo shaqo raadineed.

Carruurta (ka yar yar 18 sano) ee waalidkood ay dhaafeen 60-kii bilood ee ay caawimaada qaadaneen welina aan shaqeyn, waa loo sii wadi doonaa lacagta la siiyo tiyoo ah caddaan ama foobar.

Children (under 18 years of age) of recipients who exceed the 60-month time limit and are still not employed, can continue to receive cash assistance either in the form of cash or vouchers. Vouchers are direct cash payments to the landlord, utility company, etc. Further, recipients who are dropped from the CalWORKs Program because they have exceeded 60-month time limited are not eligible for General Relief until all of their children are 18 years of age.

Because of these new strict time limits eligible refugees should carefully consider other financial options before applying for TANF money and starting the 60-month clock. For example, the Matching Grant Program offered by many Volags, including IRC, and the CRC program offer an alternative avenue of support and assistance that preserves a refugee's CalWORKs benefits for possible use later in life. Also, CalWORKs offers a Diversion Plan, which is a one time emergency grant to help to divert families currently employed or who have a verified job offer from cash assistance. This grant could be used to pay for a car repair or back rent which may be a barrier to maintaining a job or accepting a verified job offer.

## **Sharuudaha Shaqada**

CalWORKs waxay kaloo leedahay sharuudo ay shaqada ugu talo gashay oo aad uga adag kuwii Barnaamijka Hore ee GAIN. Ummulaha waxaa shaqada laga dhaafayaa ilaa ilmahoodu ka gaarayaan 12 asbuuc oo keliya. Waalidka aan lamaanuhu la noolayn waa in ay shaqeeyaan ugu yaraan 32 saacadood asbuucii. Waalidka wada joogana waxaa laga rabaa 35 saac asbuucii in ay shaqeeyaan, waana in ay saacadahaas midkoodba haaf shaqeeyaa.

Si loo hubiyo in sharuudahan la buuxiyey, inta cayrta la qaadano, qof kasta oo qaata waxaa la weydiin doonaa in uu buuxiyo "Ballanka Cayr Ka Bixida ee Shaqo-taga", kaas oo cadeynaya xaquuqda iyo waajibaadka dadka qaata cayrta calWORKs. Tusaalayaasha waxaa ka mid ah in dadku tababaro xirfadeed bartaan iskool tagaan, (xisaab iyo Ingiriis) bartaan, waayo aragnimo kororsadaan, qabtaana adeegyo bulsho.

Haddii la buuxin waayo sharuudaha "Ballanka Cayr Ka Bixida ee Shaqo-taga" waxaa galabsanaysaa in dhamaan xaquuqahaaga la diido.

## **Adeegyada Gacan-qabadka**

Si loo xaqiijiyo in dadka cayrta qaata ay fuliyaan "Ballanka Cayr Ka Bixida ee Shaqo-taga" waxaa loogu deeqayaa adeeg gacan-qabad. Waxaa ka mid ah adeegyadaas gacan-qabad: ilmaha oo loo hayo, gaaddiid, buugta oo loo gado, qalab, dhar gaar ah,

daaweyn ama in lagala taliyo mukhaadaraadka. Adeegyada dadku xaqa u leeyihiin waxaa lagu qeexayaa “Ballanka Cayr Ka Bixida ee Shaqo-tagar”.

## **Sharuudaha Kale**

Waxaa jira sharuudo kale oo ay tahay in dadka qaata gargaarka CalWORKs ay fuliyaan si ay u sii wadaan qaadashada caawimaadan. Sharuudahaasi waxay yihiin:

- Qofka dalbanaya Caawimaadu waa in uu cadeeyaa waalidnimada uuna ka soo baxaa masruufida ilmaha.
- Waalidku waa in ay cadeeyaan in ilmaha talaaladii wada qaateen.
- Waalidku waa in uu hubiyaa in ay ilmuhu ay si fiican iskuulka u tagaan.

Tan kale, waa in la ogaadaa in aan caawimaada loo badinaynin waalidka haddii ay dhalaan ilmo kale inta ay cayrta qaadaneeyen.

## **Xatooyada**

Waxaa jira ganaaxyo cusub, oo khatar ah oo u degsan cidii lagu helo in ay xatooyo sameynayso. Tan waxaa ku jiri kara in gebi ahaanba loo diido kaalmada CalWORKs qofkii lagu helo in uu been ama xatooyo sheegay si uu u badsado lacagta uu qaato ee cayrta ah.

---

## **Kaararka Cuntada**

---

Barnaamijka Kaararka Cuntada waxaa maamusha Hay’adda Mareykanka u qaabilsan arrimaha Beeraha waana barnaamijka ugu caansan ka hortaga gaajada. Qaxootiga waxaa loo ogolyahay in la siiyo kaarar cunto oo ka gaar ah lacagta caddaanka loo siiyo sida uu dhigayo sharciga Barnamijka Gargaarka qaxootigu ee loo yiqiin AFDC immikana loo bixiyey TANF. Hoos waxaa ku qoran asteynta barnaamijkan cusub iyo sida uu u saameynayo qaxootiga.

## **U-qalmidda**

Dadka qaangaarka ah ee qaxootigaa, ee Mareykanka yimmid wixii ka dambeeyey 8-22-96, waxay xaq u leeyihiin kaararka cuntada (7) sano ee ugu horeysa immaatinkooda Mareykanka. Xilligaas kabacdi, waa in qaxootigu qaataa muwaadinnimada Mareykanka ama uu shaqeeyaa 40 rubuc si uu xaqiisa u sii wato. Ilmaha qaxootiga ah, oo ka yar yar 18 sano, iyo waayeelka ka waaweyn 65 sano , ee yimmid wixii ka horeeyey 8-22-96, waxay xaq u leeyihiin barnamij uu gobolku bixiyo haddii ay dalka joogeen 7 sano, haddii ay yihiin muwaadin iyo haddii kalaba.

## **Sharuudaha Shaqada**

Shakhsiyaadkii ka soo bixi waaya sharuudaha **CalWORKs** ee shaqo tegida waxay la kulmayaan ciqaab ah in kaararka cuntada laga jaro. Waxaa ka mid ah dadkan dadka caafimaadka qaba, laakiin diida, sabab la’aan, in ay keenaan cadeymaha shaqadooda

ama shaqo raadsiga. Waxaa kaloo kuwan ka mid ah dadka shaqadooda iyagu iska yareeya ama iskaga taga oo shaqeeya wax ka yar 30 saacadood asbuucii, sabab la'aan.

Tan kale, "dadka –awooda" in ay shaqeystaan ee u dhaxeeya 18 ilaa 50 jir ee aan ilmaana mas'uul ka ahayn waxay xaq u leeyihiin kaararka cuntada 3 bilood 36-dii biloodba haddii ayan ahayn kuwo kala bar saacadaha shaqada shaqeeya ama aan ku jirin barnaamij shaqo diyaarin.

Kuwan waxaa ku jira qaxootiga qaata Gargaarka Lacagta qaxootinimada (RCA) kana baxay 8 bilood ee ay xaq u lahaayeen qaadashada gargaarka welina aan shaqada hayn.

## **Xaq Helidda Elektooniga ah (EBT)**

Abriil 1998, Degmadda San Diego waxay bilaabaysaa barnaamij kaarka cuntada loo isticmaalayo sidii “Karedhit kaarka oo kale”. Barnaamijkaani, waxaa loo yaqaan (EBT) wuxuu saameeyaa dadka kaarka cuntada leh oo dhan. Waxaa dadka la siinayaa kaar balaastik ah oo si toos ah kharashka cuntadu ugu soo dhaco. Waxay dadka haystaa kaarka siinayaan kaashiyeerka dukaanka si looga goosto xisaabta kharashka cuntada ay gateen ee sharcigu ogol yahay. Bil walbana lacagtu si elektaroonik ah ayey kaarka ugu soo dhacaysaa inta qofka haystaa weli xaq u leeyahay.

Habkan waxaa loo sameeyey in looga hortago xatooyada cuntada oo keliyana lagu gato kharashka loogu talo galay raashinka. Habkani wuxuu dadka u sahlayaa in ay dhaqaaleystaan waxa kaarka ugu jira, si ay isku deeqsiyaan bisha.

Gobolka California wuu bedelay habka caafimaadka loo bixiyo. Dadku uma heli doonaan xaquuqda caafimaadka sidii markii “hore” uu ahaa ee MediCal-ka. Dadka cayrta qaata badankooda, waxaa caafimaadkooda lagu xirayaa “Qorshe Caafimaad”. Waxaa loo maleynayaa in habkan cusubi uu lacag badan u badbaadin doono California iyo dadka canshuurta bixiyaba, qaatayaashana uu mid sahlana u noqon doono. Habkan, dadku marka hore waa in ay doortaan Dhakhtar la socda xaaladooda caafimaad oo gaar u ah. Dhamaan goobo kale u diridu, sida saamiyada laabka oo kale am X-ray-du, waa in ay ka timaadaa Dhakhtarka Khaaska ah. Waxaa tan ka reeban oo keliya xaalada degdega ah.

## **Doorashada Rug Caafimaad**

Qoys waliba waa in uu qiimeeyaa baahidooda caafimaad ka hor inta ayan qorshe ama dhakhtar gaar ah dooran. Waxyaalaha u baahan go'aansashada waxaa ka mid ah: Inta uu u jiro Qorshaha Caafimaad gurigaaga? Rugtu ma leedahay dad kugu caawin kara luuqadaada? Ka hor inta aadan go'aansan, kala hadal arrimahaas qoyskaaga, asxaabtaada, iyo dhakhtarkaaga. Weliba, waa muhiim in aad la xiriirto rugaha caafimaadka oo aad ka codsato qoraal ku saabsan hawsha ay qabtaan iyo sida ay u qabtaan.

## **Bedelashada Rug Caafimaad**

Haddii aadan ku qanacsanayn rugta caafimaad ee aad dooratay; ama laguu qorsheeyey, waa suurto gal in aad mid kale uga bedelato. Waxaad buuxin kartaa foom MediCal oo aad ku codsanayso Rug Caafimaad oo kale. Tani waxay qaadan kartaa 15 ilaa 45 cisho si laguu bedelo. Inta lugu jiro wakhtigaas kala guurka waxaad ka heli kartaa adeegaaga caafimaad rugta aad markii hore ka tirsanayd.

Hadda dadka hela MediCal waxay leeyihiin adeega ilkaha oo ay bixiso barnaamij caam ah oo daboolaa dadka haysta MediCal-ka. Waxaa qorshahan loo yaqaan Denti-Cal. Looma baahna diwaan gelin xilli kasta ayaanad ka bedelan kartaa kan aad markaa isticmaasho. Si aad u doorato rug, waa in aad weydiisaa dhakhtarka ilkaha in uu/ay isticmaasho qorshahan Denti-Cal-ka, ama waxaad la xiriiri kartaa xafiiska Denti-Cal si uu kuu tilmaamo. Dhamaan adeegyada ilkaha ee Denti-Cal waxay bixiyaan Adeeg Ilkood (Dental-Care).

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah waxaad kala xiriiri kartaa Health Care Options/Healthy San Diego lambarkooda bilaashka ah oo ah 1-800-430-4263. Ha la xiriirin adeegahaaga waayo waxba kaama caawin karo arrintan ku saabdan. Lambarada Qorshayaasha Cafimaadka jiraa waa kuwan hoos ku qoran:

C	Community Health Group.....	1-800-640-4662
C	Compcare Health Plan.....	1-800-892-5500
F	Foundation Health.....	1-800-675-6110
G	Great American Health Plan.....	1-800-605-5509
K	Kaiser Permanente.....	1-800-464-4000
S	Sharp Advantage.....	1-800-359-2002
L	Universal Care.....	1-800-974-3348
D	Denti-Care.....	1-800-322-6384